

**Xeerka Wasiirka Hawlaha Guud 4 Janaayo 1971 lamba. 8.**

**Magacaabidda guddiga diyaarinta haynta Diiwaanka Qandaraasyada hawlaha guud**

**WASIIRKA**

Marka uu arkay Xaashida Koowaad ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969;  
Marka uu arkay Xeerka lamba. 1 ee 21 Oktoobar 1969;  
Marka uu arkay Xeerka 22 Nofembar 1970 lamba. 71 oo ku saabsan dhisidda Guddiga Qandaraasyada Qaranka Hawlaha Guud;

Marka uu garowsaday baahida loo qabo in la magacaabo Guddiga soo diyaariya keydinta Diiwaanka;

**WUXUU DEKERETO KU SOO SAARAYAA**

**Qod. 1**

Sida uu qabo faqradda 2aad ee qod 3 xeerka 22 Nofembar 1970 lamba. 71, waxaa la magacaabay guddi u xilsaaran diyaarinta keydinta Diwaanka Qaranka qandaraasyada hawlaha guud.

Guddigy wuxuu ka koobanyahay xubnaha soo socda:

- |  |            |
|--|------------|
| 1) — Madaxa Xaafiiska Qorshaynta iyo Naqshadaynta<br>Wasaaradda Hawlaha Guud | Guddoomiye |
| 2) — Sarkaal ka tirsan Wasaaradda Maaliyadda                                 | Xubin      |
| 3) — Sarkaal ka tirsan Dawladda Hoose Muqdisho                               | Xubin      |
| 4) — Sarkaal ka socda Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Gaadiidka                  | Xubin      |
| 5) — Sarkaal ka socda Wasaaradda Beeraha                                     | Xubin      |
| 6) — Sarkaal ka socda Waaxda Dhismaha Rayidka                                | Xubin      |
| 7) — Sarkaal ka socda Wax Soo Saarka Biyaha                                  | Xubin      |
| 8) — Agaasimaha Waaxda Dhismaha Dawladda                                     | Xoghaye    |

**Qod. 2**

Dekereetadaan waxaa lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 4 Janaayo 1971

Wasiirka

**Inj. Cali Xuseen Cusmaan**